

Maalinta Tirakoobka 7 Maarso 2023.

Tirakoobka 2023 wuxuu ku saabsanyahay anaga oo dhan.



Te Kāwanatanga o Aotearoa
New Zealand Government

Census | Stats^{NZ}

Tatau tātou - All of us count

Markii aan dhammaanteen ka qeybqaadano tirakoobka, dhammaanteen waan nala tirinaya.

Tirakoobka waa sahan wadanka oo dhan ah oo la qabto shan sanno walba. Waa tirada rasmiga ah ee qof kasta oo ku sugan Aotearoa New Zealand, iyo meelaha ay ku nool yihiin ama ay degan yihiin (guryaha).

Tirakoobka wuxuu ku caawiyaa qof walba inuu fahmo sida Aotearoa New Zealand ay isu beddesho muddo kadib. Waxay sidoo kale caawisaa iwi, kooxyada bulshada, iyo adeegyada qorshaha dowladda ee dadka iyo bulshooyinka, sida isbitaalada, dugsiyada, iyo gaadiidka dadweynaha.

Qof kasta oo ku sugan Aotearoa New Zealand **Maalinta Tirakoobka, Talaadada 7 Maarso 2023** waa inuu ka qeybqaataa tirakoobka. Waxaad ku sameeyn kartaa tirakoobka onleenka ama warqad.

Stats NZ waxay illaalisaa warbixintaada iyo aqoonsigaaga. Waxaan hubinaa inaan laguugu aqoonsan karin xogta aan daabacno.

Lama wadaagno jawaabahaaga shaqsiga ah qof walba, tusaale ahaan haya'adaha dowlada sida Shaqada iyo Daqliga, Kāinga Ora, Booliska, ama Socdaalka New Zealand.

Booqo www.census.govt.nz wixii macluumaad dheeraad ah. Taleefon bilaash ah **0800 CENSUS (0800 236 787)**, waxay furantahay 6 Febraayo.